

Macluumaadka Doorashada Gaarka ah ee Qaybta 3-aad ee dhacaysa 17-ka Agoosto 2021

Cod bixinta Hore

- Dhammaan cod bixiyaasha Qaybta 3-aad ee diiwaangashan waxaa loo soo diri doonaa warqadda cod bixinta ugu dambeyn 2-da bisha Luulyo.
- Haddii aadan helo warqaddaada cod bixinta marka la gaaro 12-ka bisha Luulyo, fadlan kala xiriir Xafiiska Karaaniga/Khasnajiga lambarka (802) 865-7000 (xulashada 1-aad) ama elections@burlingtonvt.gov
- Si taxaddar leh u raac dhammaan tilmaamaha markaad buuxinayso warqaddaada cod bixinta ee maqan. Hubso in aad SAXIIXDID bashqadda oo aad gudaha KU XIRTO warqaddaada cod bixinta, haddii kale codkaaga ma xisaabsano.
- Ku soo celi warqadda cod bixinta:
 - City Hall Maalinta Isniinta ilaa maalinta Jimcaha, saacadda marka ay tahay 8-12:30 iyo 1:30-4:30 ****FADLAN OGOW**** City Hall wuu xirnaan doonaa maalinta Isniinta, ee ku began 16-ka Agoosto.
 - Sanduuqa Cod bixinta ee ku yaalla:
 - City Hall – Dhinaca Waddada Weyn ee dhismaha ka soo horjeedka Tiyaatarka Flynn
 - Xarunta Dab Demiska #2 – 132 Waddada North Avenue, qaybta dambe ee dhismaha
 - Goota doorashada ee qaybta 3-aad, Dugsiga Sustainability/Dugsiga Hoose ee Lawrence Barnes, 123 Waddada North St., Maalinta Doorashada inta u dhexeysa 7-da subaxnimo ilaa 7-da fiidnimo

Cod bixinta Shaqsiga Jooga

- Goobaha cod bixinta waxay furnaan doonaan laga billaabo 7-da subaxnimo ilaa 7-da fiidnimo ee Maalinta Doorashada
- La imow warqadda cod bixinta ee boostada laguugu soo diray. Haddii aadan helin warqadda cod bixinta ama aadan la imaanin, weli waad codayn kartaa, laakiin waxaa lagaa dalban doonaa in aad marka hore saxiixdo warqad dhaar ah.

Taariikhyada muhiimka ah

2-da Luulyo – Warqadaha cod bixinta ayaa loo dirayaa dhammaan cod bixiyaasha diiwaangashan

13-ka Agoosto, saacadda marka ay tahay 4:30 galabnimo – waqtiga kama dambayska ah ee aad warqaddaada cod bixinta geenayso City Hall

16-ka Agoosto, saacadda marka ay tahay 1-da duhurnimo – waqtiga kama dambayska ah oo aad isu diiwaangelinayso in aad codayso ka hor Maalinta Doorashada

16-ka Agoosto, saacadda marka ay tahay 4:30 galabnimo – waqtiga kama dambayska ah ee aad warqaddaada cod bixinta ku ridayso sanduuqa

17-ka Agoosto – Maalinta Doorashada. Codaynta waxay furan tahay inta u dhexeysa 7-da subaxnimo-7-da fiidnimo